Siyaasadda qoysaska

17ka sebteembar oo ku aadan maalinta doorashada, waxaa go'aan laga gaari doona mustaqbilka dalka Iswiidan, xilkaasuna wuxuu saaran yahay adiga iyo aniga ba. Dhammaanteenna waxaa dusha naga saaran isla xilkaas. Codkaaga iyo kayga waa isku qiimmo. Haddaba miyaan kor u qaadna horumarka heerka sare ah, mise hoos ayaan u dhigna, anagoo karoonka shanaad ee canshuurta ka saarno khasnadda aanu wadajirka u leenahay? Miyaan horumarinaa hab-noleedka dalka Iswiidan – mise dusha ayaan u dhignaa?

Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga, waxaanu doonayna in dalka Iswiidan aanu ka dhigno dalka nolosha carruurta adduunka ugu wanaagsan. Dhammaan carruurta dalkayga ku nool waa in an ay ku barbaaraan xaalad badbaadin leh, ku koraan kuna dhistaan mustaqbilka ay doonayaan. Dhammaan waalidiinta waa in ay helan fursad ay isku qabtaan shaqadooda iyo hawlaha qoysaskooda. Haddii tirokoob ahaan la barbardhigo dalal tiro badan, siyaasaddayda qoysaska ee guusha badan, waxay keentay in dumarka ku nool dalka Iswiidan ay kaalin weyn ka qaataan suuqa shaqada. Sidaaso kale, tirada dhalmada carruurta ee dalka Iswiidan, waxay ka badan tahay kuwa tan dalalka Yurub badidooda.

Waalidiinta oo idil waxay lee yihiin caymis
Waalidiinta dalkayga ku nool dhamaantood waxay lee yihiin caymiska qoysaska ee adduunka ugu wanaagsan. Qoysaska carruurta leh, waxay kalo lee yihiin fursad ay sida iyga ugu habboon ugu faa'iideystaan caymiskaas.

Waxaan sii hagaajin doona caymiska waalidiinta. Waxaan ku biirinay hal bil oo dheeraad ah, waxaana sare u qaadnay heerkii magdhowga ugu hoseeyo u ku salaysnaa. Imminka waa 180 karoon/maalintii – carruurta dhashay/dhalan doonaan 1 luulyo ee sannadkaan. Kowda bisha luuljo ee sannadkan sare ayaa loogu qaadi doona heerka caymiska, ilaa qiyaastii 33 000 karoon/bishii. Macneheedu waxay

tahay in xilliga fasaxa waalidiinta ay waalidiinta oo idil qiyaastii heli karaan boqolkiiba sideetan 80 % ee daqligooda. Waxaa kalo la sii hagaajiyay xilliga daryeelka cunugga xannuunsan. Waxaa imminka la hela fursad u waalidku ku qaato tiro ka badan 120 maalmmod cunugiiba iyo sannadkiiba, waa haddii qofku u qabo cunug aad u jiran.

Aabeyada sidaas uga ma faa'iideystaan fasaxa waalidiinta, taaso hakad u keenta horumarka wada-simida. Haseyeeshe, sannooyinkii ugu danbeeyay waxaa hab joogta ah sare u kacay tirada aabeyada ka faa'iideysta caymiska waalidiinta, laakinse weli tiraadu way hooseeysa. Taaso weli keeneeyso in carruurtu aysan helin fursad ay kula kulmaana waalidiintooda. Kor u qaadida saqafka daqliga caymiska waalidiinta, wuxuu u gogolxaara qaadashada siman ee fasaxa waalidiinta, laakinse waxaa kaloo loo baahan yahay waxkaqabadyo lagu xagaajiyo xaaladda suuqa shaqada ee dumarka. Waxaan kalo diyaar u nahay in in annu horumarinno talooyin badan, sidii an isugu xiri lahayn qayb weyn ee caymiska waalidiinta iyo waalidka arrinta qhuseeyso. Ujeedada mugdi kuma jirto. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaanu doonaynaa caymiska qoysaska oo hab wada siman loogu faa'iideysto.

Dhammaan carruurta waa in ay helaan dugsiga billowga, hoose iyo dhexe ee wanaagsan

Waxaa loo baahan yahay dugsiyada biloowga, hoose iyo dhexe ee wanaagsan, kuwaaso leh hab baarbaarin iyo waxbarasho, carruurta dhammaantooduna ay ka heli karaan waxbarasho, ciyaarro iyo badbaadin. Dugsiyada biloowga, hoose iyo dhexe wuxuu kaalin weyn ka qaataa barashada, waana goobta ay ku kulmaan dhammaan carruurta ka yimi dhaqammo kala duwan, looguna hortago abuurida bulshada gooni goonida ah. Carruurta dhammaantooduna waa in ay helaan fursadaas, ka reebida na cudurdaar loogu dhigin awood dhaqaale, waalid shaqo la' ama la yiraahdo walaalahooda yaryar ayee aqalka la joogayan. Waxaa la shaacbixiyay in xadaynta kharashka xannaanda "Maxtaxan" aad loogu hawlgalay, dhaqaale ahaan qoysaska carruurta leh badidooda aad ayee ugu faa'iideysteen. Dugsiyadayda biloowga, hoose iyo dhexe way wanaagsan yihiin. Laakinse waxaanu doonaynaa in an hoos u dhigno tirada ka tirsan kooxaha carruurta. Dugsiyada biloowga, hoose iyo dhexe waxay u baahan yihiin in la kordhiyo shaqaaleha. Ballankii ahaa in annuu qorno shaqaalaha dugsiyada biloowga, hoose iyo dhexe, kuwaaso tiradooda ah 6 000 ayaa imminka la fulinayaa. Taaso keeni doonto in hoos loo dhigo tirada carruurta ka tirsan kooxaha carruurta.

Kaalmo-dhaqaaleedka loogu talaggalay dhammaan qoysaska carruurta leh

Kaalmo-dhaqaaleedka loo yaqaanno **"**Barnbidrag" waa kaalmo la siiyo dhammaan carruurta. Lacagtaas oo labo jeer la kordhiyay, bishii oktoobar 2005 ayaa markii ugu danbeeysay 100 karoon lagu kordhiyay, isla markaas waxaa hirgalay lacagtii dheeraadka ahayd ee

qoysaska carruurta badan la siin jiray, tiradaas oo haatan ka bilaawato cunuga labaad. Xaddaynta kharashka xannaanada carruurta iyo kordhinta kaalmo-dhaqaaleedka loo yaqaanno **“**Barnbidrag” waxay daqliga qoysaska labada carruur leh, kuwa lahaa daqli dhexdhexaad waxay daqaligooda ku kordhisay 20 000 karoon sannadkii.

Sannadkaan waxaa la xoojin doona kaalmada la siiyo qoysaska dhaqaalahooda ugu liito. Kaalmo-dhaqaaleedka loo yaqaanno “Underhållsstöd” waxaa lagu kordhin doona 100 karoon. Kaalmo-dhaqaaleedka loo yaqaanno **“**Bostadsbidrag” ee loogu tallagalay qoysaska carruurta leh, waxaa lagu kordhiyay 100 – 150 karoon/bishii. Waxaa kalo la hirgelin doona kaalmo’dhaqaaleedka kirada ee loogu talaggalay ardayda carruurta leh. Haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga waxaanu doonaynaa in dalkayga Iswiidan u ahaado dalka carruurta ugu wanaagsan carruurta ee adduunka. Sidaas awgeed, waxaanu sidii hore ba ku dadaali doona in annu horumarinno ammuuraha qoysaska carruurta leh.

Waxa lagu beddeli kara
Muruqgelintayda waxaa ka soo horjeeda isbahaysiga midigta ee xisbiga moderaterna u hogaamiyo, kuwaaso siyasadooda wajihan dalka Iswiidan ay ka duwan tahay teenna. Waxay doonayaan in afar bilood ay ka jaran caymiska waalidiinta, boqolkiiba 75 hoos u dhigaan heerka magdhowga. Xisbiga moderaterna waxay kaloo doonayaan in ay hoos u dhigaan tirada maalmaha waalidka u cunugiisa xannuunsan aqalkiisa ku daryeeli karo, 15 maalmood cunugiiba iyo sannadkiiba. Tilaabtaas oo sannadkiiba saamayn doonto carruur tiradooda gaareeyso 60 000. Ma macquul baa in carruur xannuunsan aqalkooda keligooda loogu tago, sidii xisbiga moderaterna ay awoodan in ay hoos u dhigan canshuurta dadka ugu dhaqaale fiican?

Degmooyin xisbiga moderaterna u maamulo waxaa laga hirgeliyay kaalmo-dhaqaaleedka daryeelka ee degmada “kommunala vårdnadsbidrag”. Taaso, haddii aanu nahay xisbiga socialdemokratiga aannu aqbali karin – lacagta kaalmo-dhaqaaleedkaas waxaa laga soo qaada miisaniyada dugsiyada biloowga, hoose iyo dhexe taaso hoos u dhigi doonto heerka sare ee dugsiga. Teeda kale, kaalmo-dhaqaaleedka daryeelka ee degmada “kommunala vårdnadsbidrag” waa shirqool dumarka loo dhigay, taaso keeneeyso korniinka tirada dumarka aqalkooda joogaan, oona heli doonin awood ay ku shaqaystaan nolol maalmeedkooda.

Dalka Iswiidan anagu aanu maamuli doono waa loo dhan yahay, adigu-se dalkee dooratay?